

WAKHTIGA FIRAAQADA DHALINYARADA KVAM (UNG FRITID I KVAM)

Firfircoonida fasaxa

Ee caruurta iyo dhalinyarada Kvam ee ah 11–18 sano (dhashay 2009 ama ka weyn)

Miyaad rabtaa in aad ka qeyb qaadatid mid ama firfircooniyada dhowr ah?

Xusuusnow in aad is QORTID ugu dambeyn 3 maalmood ka hor. Firfircooniyada oo idili BILAA LACAG, haddii aan wax kale la tilmaamin. Isqorista waxa laga sameynayaa foomka laga helaayo

www.kvam.kommune.no

Qofku waa in uu Kvam ku leeyahay ciwaan guri si uu uga qeyb qaato firfircoonida. Boosasku way kooban yihiin, markaa waxan isticmaalaynaa nidaamka "cidda soo hormartaa helayaa".

Waxa aan raacaynaa Hay'adda caafimaadka (Folkehelseinstituttet) tilmaamahooda khuseeya ka hortagga faafidda cudurka. Haddii aad xanuusanaysid ama calaamadihii xanuunku kaa muuqdaan, ma ka qeybgeli kartid, inkasta oo aad is qortay. Faraha mayr intaanad iman. Ung Fritid waa wadashaqeyn u dhexeysa Degmeda Herad, Iskaashiga tabaruca Grannehjelpa iyo Kooxaha tabaruca Degmeda.

Wakhtiga firaaqada dhalinyarada ee toddobaadka 26 iyo 27

Barnaamijka toddobaadka 33 dib baa laga keeni, kala soco bogga Facebook ee Ung Fritid

www.kvam.kommune.no

Beerta firfircoonida sacaad 11–14

Salaasa–Jimce 23.–26.6

Waxa aan ka buuxinaynaa hoolka Norheimsund **firfircooniyaal BADAN OO XIISO LEH**, maalin kasta toddobaadka 26aad gudahiisa. Cunto fudud baa cid kasta la siinayaa.

HINDERLØYPE = ORODKA CAQABADAHA, PUTEKRIG = BARKIMO KU DAGAALANKA
GLADIATOR = CIYAARTA LEGDINTA & ISWAAJIHIDA, STRIKKLØP = XARIG KU ORODKA
CORNHOLE = TUURYO SHIISHKA, 4 PÅ RAD = CIYAARTA 4 ISKU XIGSII
FOTBALLBILJARD = KUBAD-BILJARDED
TUMBLE TÅRN = DAARTA LIIQLIQANAYSAA
BIGG BUZZER = CIYAARTA BADHIN TAABASHADA
Iyo qaar kale oo badan

Shineemoda Kvam saacad 20: Bad Boys For Life

Jimce 26.6

Actionkomedie ay matelayaan Will Smith iyo Martin Lawrence. Waay soo noqdeen markii ugu dambeysey si ay Sharciga iyo kala dambeynta u toosiyaan. Salool iyo sharaab ayaa dhamaan cidkasta helayaa! Xadka da' da daawan karta 15 sano.

Aqoon isweydaarsi Hiphop

Salaasa iyo arbaca 30.6–1.7

2-maalmood oo aqoon isweydaarsi ah oo Henrik Nordin oo ka socda Bergen Dansesenter uu qabanaayo. Saacaddu markay tahay 11–1430 labada maalmoodba kana dhacaaya hoolka ciyaarta ee Kulturskolen. Soo qaado "kabaha gudaha" ee aan siibanayn. Cunto fudud baa la wada cunayaa.

Maalinta qoyska saacad 11–15

Arbaca 1.7

Ka dhaceysaa Hardanger Fartøyvernssenter. Firfircooniyada fara badan oo ka dhacaaya agagaarka biiyaha, oo qoyska oo dhan loogu talagalay. Cunto fudud baa la wada cunayaa.

Baaskeelka buurta

Khamiis iyo Jimce 2.–3.7

2-maalmood oo koorso ah oo uu bixinaayo **Gaute Ulltang Johannes Neteland**. Saacad 1030–1600 labada maalmoodba. Waxan ku kulmaynaa Ungdomsbasen. Cid kasta **WAA IN** ay soo **qaadato baaskeelad iyo kuufyadda baaskeeladda**. Cunto ayeynu dubanaynaa.

LAN-party saacad 20–08.

Jimce–Sabti 3.–4.7

Ka dhaceysa Dugsiga dhexe ee Kvam cidda da' doodu tahay 13 sano (Deyrta/haustiga bilaabaaya Dugsiga dhexe) iyo cidda ka weynba. SOO QAADO QALABKAAGA GAARKA AH (KOMBIYUUTARKA IYO XARKA MUHIIMKA AH OO DHAN, KUWA AADKA U DHEER), kaalay oo ciyaar! Cunto yar iyo cabitaan ayaa la qeybinayaa. Adna soo qaado "macmacaan".
Haddii aad u baahantahay in lagu soo qaado, sheeg markad isqorayso.

Xasuuso in aad iska DIIWAANGELISID 3 maalmood ka hor, adiga oo iska diiwaangelinaaya Degmeda Kvam boggooda internetta